



Iska-baaridda cudurka COVID-19 sannadka 2022



Miyaan weli iska baaraa cudurka COVID-19 sannadka 2022?

- Baaritaanka waa habka keliya ee lagu xaqiijin karo haddii aad qabto cudurka COVID-19. Oggaanshaha in aad cudurka qabto waa muhiim si aad u ilaaliso qoyskaaga, bulshadaada iyo si aad saynisyahannada u siiso xogta saxda ah ee ku saabsan faafitaanka cudurka safmarka ah.
- Baaritaanku wuxuu gacan ka geystaa yareynta faafitaanka cudurka fayraska. Marka qof laga helo cudurka COVID-19, waxaa lagu karantiili karaa guriga ama, haddii loo baahdo, cusbitaalka.

Goormee ayay tahay in la ibaaro? Haddii aan qabo astaamahan:

- Qandho ama qarqaryo
- Qufac
- Luminta dareenka urta ama dhadhanka
- Neefsigu oo dhib kugu noqdo
- Cune/dhuun xanuun
- Luminta rabitaanka cuntada
- Sanka oo duuf ka socda
- Hindhisid
- Daal ama dhacsaal xad-dhaaf ah
- Madax-xannuun
- Jir xanuun
- Lalabbo ama matag
- Shuban

Haddii aadan hubin astaamahaaga, wac khadka adeegga caafimaadka dadweynaha ee degaankaaga.

Halkeen iska soo baari karaa?

- [Alberta](#)
- [British Columbia](#)
- [Manitoba](#)
- [New Brunswick](#)
- [Newfoundland and Labrador](#)
- [Northwest Territories](#)
- [Nova Scotia](#)
- [Nunavut](#)
- [Ontario](#)
- [Prince Edward Island](#)
- [Quebec](#)
- [Saskatchewan](#)
- [Yukon](#)



Qoraalkan looguma talogalin in uu beddel u noqdo daryeelka iyo talada xirfadeed. Had iyo jeer raadso adeegyada xirfadle caafimaad ama adeeg bixiye caafimaad kale oo la aqoonsan yahay si aad u weyddiiso su'aalaha laga yaabo in aad qabto.

Financial contribution from
Avec le financement de



Public Health Agency of Canada
Agence de la santé publique du Canada

Metropolis
Institute - Institut

Waxaa xaqiijiyey MedComm – oo ah Naadiga Gaarista ee Ururka Ardeyda Caafimaadka ee McGill.



Ma dooneysaa in aad wax badan oggaato?

Waxaad halkan ka oggaan kartaa wax badan oo ku saabsan baaritaanka COVID-19:

- [Public Health Agency of Canada, 'Symptoms and Testing'](#) (Febraayo 2022)
- [BC centre for disease control, 'When to get a COVID-19 test'](#) (Maarso 2022)